

Qorshaha Dib Ugu Noqoshada Iskuullada¹ ayaa soo bandhigaya jaangooyooyinka iyo filashooyinka gobolka ee Waaxda Waxbarashada iyo Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar ee loogu talagalay hawlgalka ammaanka ah ee iskuullada dowladda inta uu jiro cudurka safmarka ah ee COVID-19. Ujeedooyinka laga leeyahay qorshaha waa in la xaddido faafitaanka suuragalka ah ee cudurka COVID-19 iyada oo sidoo kale la bixinayo waxbarasho tayo leh iyo adeegyada ardayga.

Waaxda, degmooyinka dugsiga iyo iskuullada ayaa iska kaashan doona taageeridda ardayda iyo macallimiinta. Waxaa si joogto ah diiradda loo saari doonaa xaqiijinta war-isgaarsiin daahfuran oo joogto ah, bixinta fursado loogu talagalay barashada xirfadeed iyo dhiirrigelinta hal-abuurka leh ee fasalka gudahisa ah.

IMAANSHAHA ISKUULKA IYO TIRADA KOOXDA

1. Dugsiga Xannaanada ilaa Fasalka 2aad

- Waqti dhammeystiran oo ay iskuulka ku qaataan iyagga oo macallin la joogo;
- Tirooyinka kooxaha oo yar, ku dhowaad 15 halka ay suuragal tahay; iyo
- Carruurta kooxaha gudahooda ayaa waxaa laga yaabaa in ay isla tacaamulaan balse waa in ay ka fogaadaan kooxaha kale.

2. Fasallada 3aad ilaa 5aad

- Waqti dhammeystiran oo ay iskuulka ku qaataan iyagga oo macallin la joogo;
- Tirooyinka kooxaha oo yar, halka oo ay suuragal tahay; iyo
- Carruurta kooxaha gudahooda ayaa waxaa laga yaabaa in ay isla tacaamulaan balse waa in ay ka fogaadaan kooxaha kale.

3. Fasallada 6aad ilaa 8aad

- Waqti dhammeystiran oo ay iskuulka ku qaataan iyagga oo macallin la joogo;
- Tirada ardayda fasalka ee caadiga ah; iyo
- Carruurta kooxaha gudahooda ayaa waxaa laga yaabaa in ay isla tacaamulaan balse waa in ay ka fogaadaan kooxaha kale.

4. Fasallada 9aad ilaa 12aad

- Waa in ay iskuulka u imaadaan qaab wareegto ama miilaysasho ah (ugu yaraan maalin dhaaf ah);
- Tirada ardayda fasal kasta oo yar iyada oo la ilaalinayo kala fogaanshaha jir ahaaneed; iyo
- Kala fogaanshaha jir ahaaneed ee ardayda iyo hawlweennada iskuulka ee fasalka dhexdiisa oo hal mitir ah. Ardayda lama kooxeyn doono iyada oo sabab u ah jawallada iyo ikhtiyaarada koorsada.

Marka ardayda Fasallada 9aad ilaa 12aad aysan jir ahaan iskuulka joogin, waxaa ay ka qaybqaadanayaan habab barasho isku-dhaf ah, iyada oo la adeegsanayo habab wax-dhigis kala duwan oo ay ka mid yihiin barasho internet-ka loo adeegsado, mashaariic la hago iyo barasho tijaabo ku saleysan.



Kala fogaanshaha jir ahaaneed

In kasta oo [kala fogaansho jir ahaaneed oo hal mitir ah](#) loo baahan doono inta lagu jiro fasallada 9aad iyo 10aad, masaafu laba mitir ah ayaa la dhiirrigelinayaa in laga hirgeliyo meelaha ay wadaagaan dhammaan heerarka fasallada. Tani ayaa lagu dabaqi karaa shaqaalaha iskuulka iyo ardayda marka ay ku sugan yihiin fasalka dibeddiisa.

Shaqaalaha iskuulka ayaa xaqiijin doona jawaleynta ahdaafta lagu yareynayo cariiriga si loo xaqiijiyo in kooxaha ardayda la ixtiraamo inta lagu guda jiro muddada nasashada, qadada iyo dhaqdhaqaaqa kale ee ka dhex jira iskuulka.

¹ Dokumentigan ayaa sida loo baahdo wax looga beddeli doonaa si loogu muujiyo macluumaadka caafimaadka dadweynaha. Fadlan u noqo barta internet-ka ee Waaxda Waxbarashada iyo Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar si aad uga hesho dokumentigii ugu dambeeyay. Awaamirta ayaa sidoo kale isbeddelli kara iyada oo ku xiran xaaladda Amarka Waajibka ah iyo Xaaladda Degdegga ah.

QORSHEYNTA WAXBARASHO EE SIBTEMBAR 2020

Ujeedooyinka barasho ee la qoray ayaa ardayda ku waajiba sannad dugsiyeedka 2020-21. Manhaj la beegsanayo oo diiradda lagu saarayo in ay ardaydu gaaraan natijoooyinka muhiimka ah ayaa la bixin doonaa. Waxaa jiri doona xiriir fasalka gudahiisa ah ee dhex mara hawlwadeennada iskuulka iyo ardayda oo loogu talagalay ardayda dhigata Fasallada 9aad ilaa 12aad. Waqti jir ahaan fasalka lagu qaato ee fasallada iyo iskuullada ayaa laga yaabaa in uu kala duwan yahay.

Iskuullada iyo degmooyinka dugsiya ayaa abaabuli doona iskuullada, fasallada iyo heerarka kala duwan ee waxbarasho si loo bixiyo manhajka marka la eego kooxaha iyo kala fogaanshaha jir ahaaneed. Awaamir bedqab iyo mid caafimaad oo dheeraad ah ayaa waxaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suuragalka ah loo siin doonaa degmada dugsiya iyo hawlwadeennada.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH:

- Dhammaan goobaha la heli karo ee waxbarashada ku habboon ayaa la adeegsan doonaa si barashada loo taageero. Degmooyinka iskuulka lagama reebin in ay aadaan bannaanka ama goobaha bulshada si ay ugu adeegsadaan barashada.
- Iskuullada ayaa dib-u-habeyn ugu sameyn doona falladooda qaab kor loogu qaadayo kala fogaanshaha jir ahaaneed ee fasallada gudahooda ah.
- Iskuullada ayaa dib-u-habeyn ku sameyn donna goobaha la wadaago si loo xaqiijiyo in kala fogaansho jireed ahaaneed uu u dhaxeeyo kooxaha ardayda.
- Iskuulladu ayaa laga yaabaa in ay fasallada isku-dhafaan iyo isticmaalka kooxo ka kooban fasallo isku-dhaf ah.

FASALLADA 9AAD ILAA 12AAD

- Ardaydu ayaa wax ku baran doona qaab waxbarasho isku-dhaf ah waxayna iskuulka u tagi doonaan shaqsi ahaan iyada oo lagu saleynayo hab wareegto ama miilaysasho ah ugu yaraan si maalin dhaaf ah. Ardaydu marka aysan iskuulka joogin, waxbarashadoodu waxay ka sii wadan karaan meesha fog ee ay joogaan.
- Macallimiinta ayaa ardayda loo qoondeyn doonaa iyada oo laga baraandegayo tirada ardayda ee fasalka caadiga ah.
- Macallimiinta ayaa mas'uul ka noqon doona fasalkooda oo dhan, haddii ay jir ahaan joogaan amaba ay ka qaybqaadanayaan waxqabadyada barashada ee isku-dhafan.
- Macallimiinta ayaa mas'uul ka ah abuurista natijoooyinka barashada si ardaydu ay u guuleystaan iyagga oo aan fasalka ku jirin (tusaale ahaan, barashada tijaabada lagu saleeyay, mashruuca lagu saleeyay amaba internet-ka lagu bixiyo).
- Macallimiinta ayaa looga baahan doonaa in ay hubiyaan ardayda guriga joogta in ay haystaan agab barasho iyo kheyraadka ku habboon ama in ay barashadu si toos ah uga qaataan internet-ka.
- Iyada oo ku xiran helitaanka, ardayda waxaa laga yaabaa in lagu dhiirrigeliyo in ay qaataan koorsooyin ku baxa internet-ka, fursadaha barasho tijaabada lagu saleeyay iyo hababka kale ee waxbarasho (nooca iskaashiga leh iyo noocyada kale) si loo xaqiijiyo natijoooyinka barashada. Ardaydu waa in ay heli karaan ikhtiyaarada koorsada oo debecsan.
- Tiknooloojiyad ayaa la adeegsan doonaa si loo taageero barashada. Waaxdu waxay adeegsanaysaa ikhtiyaaro lagu fududeynayo aqoon-dirsadka marka ardaydu aysan si dhab ah iskuulka u joogin.
- Iskuullada ayaa waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay eegaan jadwaladooda maalinlaha iyo toddobaadlaha ah si ay u eegaan haddii kuwan wax laga beddeli karo si loo xaddido tacaamulka u dhaxeeya ardayda iyo si loo ilaaliyo awaamirta bedqabka iyo kuwa caafimaadka.

ILAAALINTA ARDAYDA IYO SHAQAALAHA NUGUL

Ardayda iyo shaqaalaha iskuulka ee ka midka ah dadka nugul ayaa lagu dhiirrigelinayaa in ay kala tashtaan bixiyaha adeegga daryeelkooda caafimaad si loo go'aamiyo haddii ay tahay in ay iskuulka tagaan. Ardayda aan iskuulka imaan karin iyada oo sabab u ah xaalad caafimaad ayaa waxay yeelan doonaan qorshe barasho oo uu u dejiyay macallinka loo qoondeeyay oo kaashanaya taageero waxbarasho.

Qorshaha Hawlgallada

Iskuul kasta oo ay dowladdu leedahay, oo la tashanaya isuduwayaasha Bedqabka iyo Caafimaadka Shaqo ee Degmada Dugsiga, ayaa diyaarin doona Qorshaha Hawlgallada ee Cudurka COVID-19, ka hor inta aan la furin, kaasi oo sharxaya sida iskuulku uu u maareyn doono hawlgallada maalinlaha ah iyada oo la ilaalinayo jaangooyoyinka dheeriga ah. Qorshaha hawlgallada, ee ay ansixisay degmada dugsiya, ayaa faahfaahin doona habraacyada ku saabsan sida kooxaha ardayda ay u shaqeyn doonaan iyo sida ay ugu wareegayaan iskuulka (gaar ahaan meelaha uu cariiriga ka jiro iyo meelaha caamka ah sida goobaha qaanadaha, musqulaha, qolalka dharka la isaga beddelo, iwm.) iyo qorshaha meelaha la geeyo/laga soo qaado ardayda. Waxaa sidoo kale ku qornaan doona macluumaad ku saabsan saacadaha uu shaqeyo iskuulka iyo waqtiyada kala guurka ee iskuulka iyo sidoo kale hirgelinta borotakoollada caafimaadka iyo bedqabka.

